TN Department of Human Services

# SOO KOOBIDDA SHURUUDAHA RUQSAD SIINTA EE HAY'ADAHA DARYEELKA CARRUURTA

Tani waa hagitaan loogu talagalay hay'adaha daryeelka carruurta ee la ruqsad siiyay. Waaxda Adeegyada Aadanaha (Department of Human Services) waxay ruqsad siisaa hay'adaha daryeelka carruurta ee daryeela ugu yaraan shan (5) carruur oo aan isku qoys ahayn, kuwaas oo shaqeeya saddex (3) saacadood ama ka badan maalintii, haddii aan laga dhaafin mooyee. Su'aalaha la xiriira shuruudahan waa in loo gudbiyaa xafiiska deegaanka ee DHS. Soo koobiddaan kuma jiraan dhammaan shuruudaha; sidaasi darteed, waxaad ka codsan kartaa hay'adaada xeerarka ruqsadda oo dhammaystiran ee loogu talogalay hay'adaha daryeelka carruurta, ama waxaad ka heli kartaa xeerarka adigoo ka galaaya websaydhka Waaxda.

## Milkiyadda, Qaab-dhismeedka, iyo Maamulka

- Daryeelka guud ee masuuliyadda, masuuliyadda baabuurta, lacag-bixinta caafimaadka, caymiska ku saabsan xadgudubka iyo kufsiga carruurta waa in la ilaaliyaa oo lagu daboolaa hawlaha xarumaha iyo gaadiidka hay'adda daryeelka carruurta.
- Hay'adaha daryeelka carruurta waa inay ku shaqeeyaan milkiyad iyo xaalad sharci oo ganacsi oo la mid ah midda ku qoran ruqsadda.
- Diiwaangelinta carruurta ka yar lix (6) toddobaad jir waa la mamnuucay.
- Carruurtu waa in aysan kusii jirin daryeelka in ka badan laba iyo toban (12) saacadood muddo labaatan iyo afar (24) saacadood ah, marka laga reebo xaalado gaar ah.
- Isla wadaagista goobaha xarumaha ee u dhexeeya hay'adaha lama oggola, marka laga reebo goob jimicsi, makhaayadda, ama garoomada ciyaarta, haddii carruurta barnaamijyada kala duwan aysan isla waqtigaas isticmaaleyn goobtaas.
- Hay'addu waa inay haysaa dukumiinti qoran oo muujinaya in waalidku booqasho toos ah ku tagay xarunta si uu u eego goobta daryeelka iyo xeeladaha la xiriira ka-qaybgalka waalidiinta, ka hor inta aan la diiwaangelin ilmaha (shuruudan lagama rabo carruurta qoysaska aan hoyga haysan).
- Hay'adaha daryeelka carruurta waa inay sameeyaan siyaasad baaritaan daroogo oo lagu sameynayo dhammaan shaqaalaha xiriirka tooska ah la yeelanayo carruurta.
- Nuqul ka mid ah siyaasadaha hay'adda, habraacyada, iyo Soo Koobidda Shuruudaha Ruqsadda ee Waaxda waa in la siiyaa waalidka marka ilmuhu la diiwaangelinayo.
- Waalidiintu waa in loo oggolaadaa inay arkaan shahaadada(ooyinka) xirfadeed ee shaqaalaha marka ay codsadaan.
- Inta lagu jiro saacadaha shaqada, waalidiinta waa in loo oggolaadaa inay si toos ah ugu tagaan carruurtooda, haddii aanay jirin dukumiintiyo sharci ah oo mamnuucaya ama xaddidaya tagitaankaas.
- Hay'addu waa inay la yeelato xiriir joogto u socda waalidiinta/masuuliinta si ay ugu daraan manhajka, isbeddellada ku imaada shaqaalaha, isbeddellada siyaasadaha iyo/ama shuruudaha ruqsad siinta ee muhiimka ah, iyo wax kasta oo saamaynaya daryeelka maalinlaha ah ee carruurta, oo waa in isgaarsiintaas loo diiwaangeliyaa qoraal ahaan.
- Hay'adaha daryeelka carruurta waa inay bixiyaan macluumaad ku saabsan faa'iidooyinka ka tallaalida carruurta hargabka iyo cudurrada kale ee la is qaadsiiyo Agoosto ama Sebteembar kasta, iyadoo macluumaadkaas la siinayo waalidiinta/masuuliinta ee dhammaan carruurta loo diiwaangaliyay hay'adda daryeelka, oo waa in isgaarsiintaas loo diiwaangeliyaa qoraal ahaan.
- Ruqsad-siyaha iyo shaqaalaha hay'addu ma shaacin karaan, umana oggolaan karaan si ula kac ah isticmaalka dadyow kale, macluumaad kasta oo ku saabsan ilmo ama qoys, marka laga reebo haddii sharcigu uu oggolaanayo.
- Ruqsadda hadda ee hay'adda daryeelka carruurta iyo dhibcaha nidaamka tayada iyo horumarinta waa in lagu dhejiyaa meel u dhow albaabka weyn laga soo galo ee xarunta.
- Siyaasadda qoraal ah ee ka saarista ilmaha waa in si cad loogu sharraxaa waalidiinta iyo shaqaalaha.

## Shaqaalaha

- Agaasimaha waa inuu goobta joogaa ku dhawaad 50% saacadaha hawlgalka billaha ee hay'adda.

- Hay'adaha daryeelka ilmaha ee qoysaska iyo guryaha kooxeed waa inay waalidiinta hore u sii ogeysiiyaan qofka u xilsaaran marka baraha ugu weyn uu maqanyahay.
- Xubin shaqaale waa in si gaar ah loogu magacaabaa inuu noqdo masuulka hay'adda daryeelka carruurta marka macallinka/agaasimaha ugu weyn uu maqanyahay, oo magaca qofkaas waa in la ogaysiiyaa shaqaalaha. Qofkaas waa inuu si buuxda u yaqaannaa siyaasadaha/habraacyada hay'adda daryeelka carruurta. Agaasimaha/Baraha ugu weyn ama qofka loo wakiisho waa inuu hubiyaa in qofka shaqaalaha loo xilsaaray uu yahay qof jir ahaan, maskax ahaan, iyo dareen ahaanba awood u leh inuu si badqab leh oo habboon uu u siiyo daryeel carruurta.
- Ka hor inta aysan wax xiriir ah la yeelan carruurta, shaqaalaha cusub waa inay helaan jiheyn iyo tababar adeega ka hor ah, iyo sidoo kale tababar ku saabsan tababar ku saabsan cudurka ruxista ilmaha, dhaawaca madaxa ee ka dhasha xadgudubka, iyo si xun ula dhaqanka carruurta.
- Beddelayaasha iyo ardayda tababarka ku jirta ee bixinaya adeegyo wax ka badan 36 saacadood sanadkiiba waa inay buuxiyaan shuruudaha baaritaanka asalka oo ay sameeyaan baaritaan caafimaad kahor inta aysan bilaabin shaqadooda. Intaa waxaa dheer, waa inay helaan tababar ku saabsan siyaasadaha iyo habraacyada hay'adda ee la xiriira qorshayaasha u diyaargarowga xaaladaha degdegga ah, soo sheegista ku xadgudubka ilmaha, dayacaadda, iyo si xun ula dhaqanka, iyo caadooyinka seexinta badqabka ah, ka hor inta aysan ka shaqeyn hay'adda.
- Hay'aduhu waa inay hayaan diiwaaada ku saabsan saacadaha ay shaqeeyeen shaqaalaha beddelka ah iyo ardayda tababarka ku jirta, isla markaana ay u soo gudbiyaan DHS marka laga codsado.
- Mutadawiciinta laguma tirin karo xisaabta saamiga dadka waaweyn: carruurta mana aha inay waligood kaligood lagu dhaafo carruurta.

## Hubinada Dambiyada Asalka ah

- Hubinada dambiyada asalka ah waa in lagu sameeyaa

dhammaan shaqaalaha ugu yaraan shan (5) sano walba.

- Dadyowgan soo socda waa in lagu sameeyaa hubinta asalka dambiyada wax aan ka badnayn sagaashan (90) maalmood ka hor inta aysan galin xarun kasta oo daryeelka carruurta ah: qof kasta oo iska leh ama ka shaqeeya xarun daryeel carruur; qof kasta oo codsada inuu ka shaqeeyo xarun daryeel carruur; qof kasta oo bixin doona adeegyo beddel ah muddo ka badan lix iyo soddon (36) saacadood sanad gudihiis isla markaana lagu tiriyo tirada dadka waaweyn ee carruurta la jooga; iyo qof kasta oo shan iyo toban (15) sano jir ah ama ka weyn oo degi doona xarun daryeel carruur.
- Qof shaqaale ah, oo ku noolaa ama ka shaqeeyay gobol kale 5-tii sano ee la soo dhaafay, wuu bilaabi karaa shaqada marka uu helo warqad oggolaansho ku-meelgaar ah oo u oggolaanaysa inuu shaqeeyo isagoo kormeerayo shaqaale kale oo si buuxda loo hubiyay, ilaa dhammaan natiijooyinka gobollada kale laga helayo.

**Diiwaannada iyo Warbixinta**

- Diiwaan loogu talogalay canug walba waa in uu yaalaa xarunta daryeelka carruurta gudaheeda.
- Dhammaan diiwaannada waa in si nidaamsan loogu kaydiyaa goobta xarunta, meel dhexe oo qaab elektaroonik ahaan loo heli karo, oo laga yeelo kuwo la heli karo marka ay Waaxdu soo codsato.
- Qorshe qoraal oo ficil ah waa inuu ansaxiyaa dhakhtar oo loogu talagalay cunugga qaba xasaasiyad nafta halis gelisa.
- Waalidka waa inuu bixiyaa oggolaansho qoraal ah daryeelka/daaweynta xaalada degdegga ah.
- Bayaan qoraal ah waa in ay ku jirtaa faylka oo tilmaamaysa cidda ilmaha loo sii dayn karo.
- Waa in la hayaa heshiis qoraal ah oo gaadiid ah oo u dhexeeya waalidka iyo xarunta daryeelka carruurta ee ku saabsan gaadiidka maalinlaha ah.
- Diiwaanada xaadiritaanka maalinlaha ah kuwaas oo ku jira magaca buuxa iyo waqtiga soo galitaanka iyo bixitaanka canug walba waa in lagu hayaa goobta ama qaab elektaroonik ah waa in loo heli karaa.
- Xarunta daryeelka carruurta waa in ay heshaa warqad oggolaansho gaar ah oo waalidku saxiixay oo uu taariikheeyay safar kasta ka hor inta aan la samayn hawshaas.
- Ilmo kasta oo saqiir ah, socod barad ah oo ah caruurta dugsiga hore dhigta waa inuu leeyahay qorshe qoraal oo kala-guur ah marka uu u gudbayo koox da'eed kale.
- Diiwaanada ilmo kasta oo jira shan (5) sano ama wixii ka weyn oo ku jira xarun aan haysan oggolaansho rasmi oo dugsiga barbaarinta ah waa inay ku dartaa qirasho ay saxiixeen waalidka ilmaha ee aqoonsada in xaadiritaanka ilmaha uusan ku qancineyn shuruudaha dugsiga barbaarinta ee khasabka ah ee loogu talagalay diiwaangelinta ilmaha ee fasalka koowaad.
- Carruurta ka socota qoysaska hoy la'aanta ah, carruurta ay hayso dawladda, iyo qaxootiga ama magangelyo-doonka waxaa la siin karaa daryeel muddo aan ka badnayn lixdan (60) maalmood ka hor inta aan la keenin dukumiintiyada tallaalka iyo baaritaanka fayoqabka ilmaha.

**Ka Warbixinta Dhacdooyinka**

- Dhacdooyinka, shilalka, dhaawacyada, iyo calaamadaha xanuunku waa in waalidka lagu wargeliyaa ugu dambayn waqtiga ilmaha la sii daynaayo isla maalinta ay dhacdadu dhacday, oo waa in si degdeg ah loo diiwaangeliyaa iyadoo la bixinayo macluumaad faahfaahsan; macluumaadkaas oo kale waa in la siiyaa waalidka isla maalina uu shilka dhacay, oo lagu kaydiyaa diiwaanka ilmaha.
- Xarunta daryeelka carruurta waa inay wargelisaa Waaxda dhammaan dhacdooyinka halista ah isla maalinta ay dhacaan, iyagoo kala xidhiidhayo khadka cabashada ama ku gudbinayo portal-ka waalidka.
- Dhacdooyinka culus oo la xiriirta shaki ku saabsan jirdil ama dayacaad carruur waa in si degdeg ah loogu soo sheego Waaxda Adeegyada Carruurta (Department of Children's Services).

**Waajibaadka Lagu Soo Sheegayo Xadgudubka iyo Dayaca Carruurta**

- Qof kasta oo ka shaqeeya, milkiilaha ah, ruqsad hayste ah, agaasime ah, macallinka ugu weyn, ama xubin ka tirsan shaqaalaha, ama xubin shaqaale beddel ah ama mutadawac ah oo ka tirsan xarun daryeel carruur oo ay ruqsad siisay Waaxda Arrimaha Aadanaha (Department of Human Services), waa qof mas'uul ah shaqsi ahaan waxaana looga baahan yahay in uu si degdeg ah u soo sheego shaki walba oo macquul ah ee ku saabsan xadgudub ama dayaca carruurta, iyagoo u sheegaaya Waaxda Adeegyada Carruurta (Department of Children's Services), iyo/ama ciidamada booliska ee deegaanka, ama garsooraha maxkamadda carruurta ee ku taalla degmada uu ilmuhu degan yahay, sida ku xusan shuruucda T.C.A. §§ 37-1-403 iyo 37-1-605.
- Dhamaan shaqaalaha xarumaha daryeelka carruurta waa in ay sanad kasta helaan tababar ku saabsan habraaca saxda ah ee lagu soo sheego xadgudubka iyo dayaca carruurta.

**Kormeeris**

- Dhamaan qaybaha dhismaha iyo dhulalka waa in si muuqata loo kormeeraa marka la xirayo maalinta, si loo hubiyo inaan ilmo si kama' ah loogu tagin qayb ka mid ah xarumaha.
- Carruurta waa in loo sii daayaa oo keliya waalidkooda ama qof kale oo waalidku u oggolaaday iyadoo la raacayo siyaasadaha xarunta daryeelka carruurta.
- Hay'adaha daryeelka carruurta waa inay hayaan warqad si maalinle ah loo saxiixo oo lagu soo galo laguna baxo ama diiwaan elektaroonig ahaan loo saxiixo oo lagu soo galo laguna baxo kaas oo xambaarsan magaca buuxa ee ilmaha oo la daabacay ama la qoray, taariikhda, waqtiga uu soo galay, waqtiga uu baxay, iyo magaca qofka keenay iyo kan qaaday ilmaha.
- Macallimiinta kormeeraaya carruurta inta lagu jiro waqtiyada cuntada ama cunto fududka waa laga mamnuucay inay ku mashquulaan hawlo aan khusayn waqtiga cuntada inta carruurtu cunayaan.
- Hay'adaha daryeelka carruurta waa inay soo saaraan, raacaan, oo dhejiyaan qorshe kormeeris xiliga cuntada ah oo qoran.
- Hay'adaha daryeelka carruurta waa inay diyaariyaan oo raacaan qorshe kormeeris oo garoonka ciyaarta ah oo qoran.
- Hay'adaha daryeelka carruurta waa inay diyaariyaan oo raacaan qorshe kala-guur oo qoran.
- Hay'adaha daryeelka carruurta waa inay diyaariyaan oo raacaan qorshe kala-guur oo qoran kaas oo ku jira tirakoob loo sameeya magac-ilaa-wajiga ah carruurta.
- Inta lagu jiro safarrada goobta, saamiga dadka waaweyn iyo carruurta waa in la labajibaaraa, oo xaadiritaanka waa in la hubiyaa ka hor inta aan laga bixin hay'ada daryeelka carruurta, marka la gaaro goobta la rabay, bilowga iyo dhammaadka hawl kasta, marka laga tagayo meel kasta iyo marka lagu soo laabanayo hay'ada daryeelka carrururta.
- Xarumaha daryeelka carruurta ee qoysaska iyo

kooxaha ah saamiga dadka waaweyn:carruurta waa in lagu kordhiyaa hal (1) inta lagu jiro safarrada goobta.

- Marka carruurta ay ku hawlan yihiin hawlo ka dhacaya ama u dhow meel biyo ah, shuruudahaan soo socda waa in la raacaa:

| Kooxda Da'da | Saamiga Dadka Waaweyn:Carruurta |
|---|---|
| 6 toddobaad–12 bilood | 1:1 |
| 13 bilood – 35bilood | 1:2 |
| Seddex (3) sano jir | 1:3 |
| Afar (4) sano jir | 1:4 |
| Shan (5) sano jir | 1:5 |
| Da'da Dugsiga (Fasalka Barbaarinta iyo wixii ka sareeya) | 1:10 |

- Hal (1) qof oo dad weyn ah oo goobta jooga waa inuu haystaa shahaado ansax ah oo muujinaysa xirfadaha horumarsan oo ku saabsan badbaadinta biyaha, oo waa inuu kormeeraa meel ka sarreysa heerka dabaalayaasha.
- Waa in la raacaa habraacyada hurdada badqabka ah si looga hortago neef-qabatin iyo dhimasho ku timaadda dhallaanka:
  - ✓ Dhallaanka waa in ay ku seexdaan sariiro ama meelaha lagu ciyaaro ee leh meel adag oo lagu seexdo iyo gogol si fiican u dhegan.
  - ✓ Dhallaanka waa in aysan ku seexan fadhiga, joodari jilicsan, sariiraha dadka waaweyn, kuraasta gaariga, lulayaasha, ama qalab kale oo xannibaad ah.
  - ✓ Dhallaanka waa in la seexiyaa iyagoo dhabarka u jiifa.
  - ✓ Dhargashiga waa in laga saaraa dhallaanka ka hor inta aan la seexin sariirta.
  - ✓ Alaabta jiifka oo jilicsan, moobeelada iyo alaabta lagu ciyaaro oo lagu dhejiyo qeyb kasta oo ka mid ah sariirta waa la mamnuucay.
  - ✓ Ilmaha ku hurda kursiga gaariga ama uu ku seexdo qalab aan ahayn sariir, waa in si degdeg ah looga soo saaraa oo lagu seexiyaa dhabarka sariir.
  - ✓ Ka fogow in dhallaanku kulululaado, hubina in uu xirto dhar ku habboon deegaanka (oo aan ka badnayn 1 lakab dhar ah intii qof weyn xirto isla jewigaas).
- Hab-dhaqan kasta oo ka reeban nidaamyada hurdada badqabka ah ee waaxda looma isticmaali karo iyada oo aan la haysan oggolaansho qoran oo ka timid dhakhtar.
- Haddii ay jiraan carruur hurda ama nasanaya xilliga habeenkii, waa in hal (1) qof oo weyn oo macalin ah uu soo jeedo uuna kormeeraya.

**<u>Caafimaadka iyo Badqabka</u>**

- Carruurta waa in la hubiyaa maalin kasta marka ay yimaadaan si loo ogaado calaamadaha cudur ama dhaawac.
- Macallinka qaabilaaya waa inuu diiwaangeliyaa calaamado ama dhaawacyo muuqda, isla markaana qoraa wixii faallooyin ah ee waalidku bixiyo ee la xiriira calaamadaha ama dhaawacyadaas.
- Ilmo ka muuqata calaamado cudur waa in lagu daryeelaa meel ka gooni ah carruurta kale, iyadoo la hubinayo in kormeerka guud ee carruurta oo dhan la sii wado, waxaana lala xiriirayaa waalidka si loo sameeyo qorshooyin lagu soo qaado ilmaha.
- Ugu yaraan hal xubin oo shaqaalaha ka mid ah oo haysta shahaaadao gargaarka degdegga ah iyo hal kale oo haysta shahaadada CPR (dib u noolaynta wadnaha iyo neefta) waa inay mar walba goobta joogaan.
- Canug laga helay cudur faafa waa inuu keenaa caddeyn daawayn ah ka hor inta aan dib loogu oggolaan xarunta, haddii ay lagmaa mamaarmaan tahay.
- Waalidiinta/mas'uuliyiinta carruurta diiwaangashan waa in si degdeg ah loo wargeliyaa haddii cudur faafa oo la xaqiijiyay laga helo hay'ada.
- Dawooyinka idil waa in waalidka uu ka qaadaa shaqaale loo xilsaaray, waxaana daawooyinka siin kara oo keliya shaqaalaha soo qaatay tababar ku saabsan sida saxda ah ee loo siiyo dawada.
- Daawooyinka aan la isticmaalin waa in dib loogu celiyo waalidka.
- Dawada waa inaan marnaba lagu siin ilmaha iyadoo lagu shubayo dhalooyin ama weelasha quudinta dhallaanka, haddii aanay jirin oggolaansho qoraal ah oo uu bixiyay dhakhtar.
- Dhammaan dawooyinka waa in aanay carruurtu heli karin, ilaa uu dhakhtar bixiyo oggolaansho rasmi ah oo sannadka dugsiga hadda socda, kaas oo u oggolaanaya ilmaha da'da dugsiga inay iyagu is-daweeyaan.
- Kireemka xafaayadda, boomaatooyinka, kiriimyada qorraxda laga difaaco, iyo kareemada kale waa in aysan carruurtu heli karin.
- Sigaar-cabista ama sigaar qiijinta waa laga mamnuucay dhammaan meelaha gudaha iyo gaadiidka ay leedahay hay'ada daryeelka carruurta wakhti kasta.
- Sigaar-cabista ama sigaar qiijinta sidoo kale waa laga mamnuucay goobta ciyaarta ama meel kasta oo banaanka ah oo carruurtu isticmaalaan inta ay goobta joogaan.
- Isticmaalka cabitaanka khamriga waa laga mamnuucay hay'ada daryeelka carruurta inta lagu jiro saacadaha shaqada.
- Hubka waa in aan lagu sidan goobaha hay'ada daryeelka carruurta, gaadiid walba oo lagu qaado carruurta, ama meel kasta oo ay carruurtu joogaan, marka laga reebo askari amni oo hubaysan oo buuxiyay dhammaan shuruudaha tababarka iyo diiwaangelinta, isla markaana loo xilsaaray ilaalinta hay'ada.
- Guryaha gaarka loo leeyahay, hubka waa in la xiraa oo laga saaraa rasaasta, halka rasaastuna lagu xiraa meel kale oo gooni ah.
- Dhammaan waxyaabaha lagu calaamadeeyay "ka ilaali meelaha carruurta ay ka gaari karaan" waa inaysan carruurtu heli karin.
- Alaabada gaarka ah ee shaqaalaha ama dadka degan waa in aysan carruurtu heli karin.
- Xafaayadaha carruurta waa in si joogto ah loo hubiyaa maalinta oo dhan si loo ogaado haddii ay qoyan yihiin ama wasakhaysan yihiin.
- Macallimiinta waa inay bixiyaan is-dhexgalo bulsho oo wanaagsan oo ay ku haayaan xiriir indhaha toos ah marka ay beddelayaan xafaayadaha.
- Macallimiintu waa inay raacaan habraacyada nadaafadda marka ay beddelayaan xafaayadaha.
- Carruurta da'da iskuulka ku jirta ama ka horreeya ee u baahan gargaar marka ay musqusha isticmaalayaan waa in lagu caawiyaa meel loogu talagalay, taas oo siinaysa asturnaan.
- Hay'adaha daryeelka carruurta waa inay isticmaalaan alaabooyinka nadiifinta, gacmo nadiifinta iyo jeermis dilida diiwaangelisay Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka (U.S. Environmental Protection Agency – EPA).
- Xubnaha shaqaalaha ee qaba calaamadaha cudurka faafa waa in aanay joogin xarunta.

## Cunto iyo Adeegga Cuntada

- Macallimiinta iyo carruurtuba waa inay gacmahooda ku dhaqaan saabuun iyo biyo.
- Carruurta waa in lagu fariisiyaa miisas iyo kuraas ku habboon cabirkooda, oo macallin waa in uu agjoogaa miis kasta ama kursi sare oo ilmuhu ku cunayaan.
- Dhallaanka aadka u yar waa in la qabtaa marka uu ka cabbayo dhalo haddii dhalaanka ee uu aad uga yaryahay inuu isticmaalo kursi sare.
- Macallimiinta waa inay hubiyaan in dhallaanku dhammeeyeen cabitaanka oo ay liqeen dhammaan caanaha ama iskudardarka ka hor inta aan la seexin.
- Dhalooyinka waa in aan lagu taageerin ama la siiinin ilmo isagoo afgambi u jiifa.
- Carruurta waa in aan loo oggolaanin in ay maalinta oo dhan ay qaataan dhalo.
- Carruurta looma oggola in ay cunaan ama cabbaan iyagoo saaran sariiraha, gogolada, sariir carruureeda ama roogaga hurdada.
- Si looga hortago dhaawacyada la xiriira kuleyliyeyaasha dhalooyinka, digsiyaasha korontada, iyo jikooyinka foornada:
  - ✓ Digsiyaasha korontada waa laga mamnuucay in loo adeegsado sidii kuleyliyaal dhalo ahaan.
  - ✓ Digsiyaasha korontada waa in lagu hayaa jikada oo aanay carruurtu gaadhi karin.
  - ✓ Foornooyinka cuntada lagu kariyo iyo meelaha agagaarkooda, oo ay ku jiraan fiilooyinka, waa in aysan gaarin carruurta.
  - ✓ Carruurta da'da iskuulka ku jirta waa in ay isticmaalaan jikada korontada oo keliya marka ay kormeer toos ula joogo.
- Si looga hortago cunto ku saxashada:
  - ✓ Cuntooyinka adag, oo ay ku jirto daqiiqda, waa in aan la siinin carruurta leh awood cunis caadi ah dhalooyinka ama quudiyeyaalka dhallaanka haddii aanay jirin oggolaansho qoraal ah oo dhakhtar bixiyay oo lagu hayo faylka.
  - ✓ Cuntada waa in aysan heli karin ama aan la siin carruurta ilaa la jarjaro, la jejebiyo, la tumo, ama la shiido si ay ugu habboonaato da'da iyo awoodda calalin iyo liqid ee ilmaha.
  - ✓ Macallimiintu waa inay hubiyaan in aan wax cunto ah ugu hadhin afka ilmaha ka hor inta aan la seexin.
  - ✓ Macallinka waa laga mamnuucay inuu qabto hawlo fasalka ah oo aan khusayn cuntada inta lagu jiro waqtiga cuntada.
  - ✓ Carruurta waa in aysan xidhan silsilado ilko-gashi ah, afgashi, ama wax kasta oo qoorta uga xiran ama dharka uga dheggan.
- Caanaha naaska ama iskudardarka hadhay quudinta kadib waa in la tuuraa iyadoo la raacayo wakhtiyada uu soo jeediyay Xarunta Xakamaynta iyo Ka Hortagga Cudurrada (Centers for Disease Control and Prevention – CDC).
- Caanaha naaska ee la qaboojiyey waa in lagu calaamadeeyaa taariikhda la soo saaray iyo magaca ilmaha.
- Cunto, caanaha iskudardakar, caano ama caanaha naaska ee laga keeno guriga waa in lagu calaamadeeyaa magaca ilmaha, taariikhda la keenay, waa in si degdeg ah loogu ridaa qaboojiyaha.
- Weelasha cuntada ilmaha ee hore loo furay looma oggola in la keeno hay'ada daryeelka carruurta.
- Haddii macallinku cuntada toos uga siiyo ilmaha weelka, weelkaas waa in la isticmaalaa hal mar oo keliya kadibna la tuuraa.
- Cuntada ay xaruntu bixiso waa in ay waafaqsan tahay tilmaamaha nafaqada ee Barnaamijka Cuntada Carruurta iyo Dadka Waaweyn ee USDA (Child and Adult Care Food Program – CACFP).
- Cabitaannada sonkorta leh looma oggola in carruurta lagu siiyo wakhti kasta hay'ada daryeelka carruurta.
- Carruurta waa in la siiyaa waqti ku filan oo ay ku cunaan.
- Cunto looma adeegsan karo abaalmarin ahaan, lagumana qasbi karo mana laga celin karo.
- Xasaasiyadda cuntada ee ilma kasta waa in lagu dhejiyaa meshal lagu diyaariyo ama lagu qaybiyo cuntada.
- Ilmaha qaba xasaasiyad khatar ah oo nolosha halis gelisa qorshe ficil qoran waa in lagu dhajiyo meesha macallinka uu si degdeg ah uga heli karo.
- Hay'ada waa inay samaysaa habab fududeeya oo taageera go'aanka qoyska ee ah inay sii wadaan naas-nuujinta.
- Cunto guriga lagu keydiyay iyo caano ceeriin waa la mamnuucay.

## Qalabka Loogu Talogalay Carruurta

- Qalab iyo alaabaha ku habboon da'da carruurta soo koreysa waa in la heli karaa koox da'eed walba.
- Dhammaan qalabka waaweyn oo culus ee gudaha iyo dibadda, alaabta guriga waa in si adag loo sugaa si looga hortago inay dhacaan ama rogmaan.
- Xargaha korontada iyo kuwa daahyada ama daahgashiga waa in aysan carruurtu heli karin.
- Qalabka gudaha, agabka iyo alaabta lagu ciyaaro waa in la heli karaa si ay u siiyaan hawlo kala duwan oo ku habboon horumarkooda, si mid kasta uu ugu yaraan u yeesho laba (2) ikhtiyaar inta lagu jiro waqtiga ciyaarta.
- Qolalka dhallaanka/ilmaha garguurta, waa in la siiyaa qalab iyo meel ammaan ah oo lagu fuulo, lagu gurguurto, lagu istaago, laguna sahamiyo iyaga oo aan adeegsan qalab xannibaya dhaqdhaqaaqa.
- Jimbaarta lagu boodboodo waa mamnuuc.
- Qalabka fuulista, lulidda iyo qalabka kale ee culus ee dhaawac sababi kara haddii uu dhaco waa in si adag loo sugaa.
- Qalabka fuulista iyo lulidda waa in ay yeeshaan sagxad ilaalin ah oo hoos taala oo uu aqoonsan yahay CPSC, taas oo jiidata shoogga ama dhaawaca.
- Qalabka la qaadi karo waa in si adag loo sugaa ama loo dhigaa meel aan la dhaqaajin karin haddii soo-saaraha uu sidaas faro.
- Meel deggan oo lagu nasto iyo sariiro yaryar ama rooga waa in ay heli karaan carruurta doonaysa inay nastaan ama seexdaan.
- Sababo caafimaad iyo badqab awgood, sariir kasta, gogol ama roog waa in la calaamadeeyaa si loo hubiyo in ilmo kasta uu seexdo gogoshiisa u gaarka ah.
- Sariiraha dhallaanka iyo meelaha lagu ciyaaro waa inay waafaqaan shuruudaha CPSC.
- Joodariyaasha iyo suufka jilicsan waa in si fiican ugu habboonaadaan sariirta, iyada oo aan meel bannaan ama farqi jirin, si looga hortago neef-qabatowga.
- Buste ama go' waa in la siiyaa ilmo kasta oo ku seexanaaya roog.

## Horumarinta Barnaamijka, Luugadda iyo Aqoonta Akhriska/Qoraalka

- Ilmo kasta waa inuu helaa fursad uu kaga qayb

qaato hawlaha barnaamijka.
- Macallinka(miinta) waa inay siiyaan fiiro gaar ah ilmo kasta maalinta oo dhan.
- Marka ay yimaadaan, dhallaanka iyo ilmaha guurguurta waa in isla markiiba laga saaraa kuraasta gaariga.
- Ilmaha marna looma oggola in lagu dhaafo kaligood iyagoo ku jira qalab xaddidaya dhaqdhaqaaqa, sidoo kale laguma hayn karo qalabkaas wax ka badan shan iyo toban (15) daqiiqo, marka laga reebo marka uu cunayo isagoo ku fadhiya kursi sare.
- Isticmaalka aaladaha elektaroonigga ah iyo warbaahinta kale ee elektaroonigga ah waa ka mamnuuc carruurta da'doodu ka yar tahay laba (2) sano.
- Barnaamijyada, filimada, ciyaaraha kombiyuutarka iyo muusigga wata rabshado ama nuxur dadka waaweyn loogu talagalay lama oggola in lagu shido carruurta hortooda.
- Xarumaha daryeelka carruurta waa inay waalidiinta siiyaan ogeysiis qoraal ah haddii la qorsheeyay in carruurta la tuso barnaamij warbaahineed.
- Carruurta aan rabin inay ka qayb qaataan waqtiga warbaahinta waa in loo oggolaadaa hawlo kale oo ay doortaan.
- Carruurta da' kasta leh ee la daryeelayo in ka badan saddex (3) saacadood oo maalin ah waa in ay helaan fursad ay banaanka ugu ciyaaraan maalin kasta.
- Haddii cimiladu ogolaato, dhallaanka waa in la geeyaa banaanka laba ilaa saddex jeer maalintii.
- Carruurta waa in si habboon loogu lebisaa, waana in muddada banaanka lagu qaadanayo lagu saleeyaa xaaladda cimilada iyo da'da ilmaha.
- Marka carruurtu banaanka ku ciyaarayaan, macallimiintu waa inay feejignaadaan calaamadaha daalka cimilada la xiriira sida fuuqbax ama qabow xad dhaaf ah.
- Carruurta la daryeelayo lix (6) saacadood ama ka wax badan waa inay helaan fursad nasasho ah oo ay jiifsadaan.
- Wax ilmo ah laguma qasbi karo inuu seexdo ama jiifto muddo dheer roog ama sariir daryeelka ah.
- Goobaha hurdada waa inay leeyihiin iftiin ku filan si macallinku uu si degdeg ah u arki karo ilmo kasta uguna falceliyo marka loo baahdo, si uu uga jawaabo baahiyahooda jireed iyo shucuureed.
- Haddii muusig la shido meelaha carruurtu ku hurdaan, waa inay ahaataa mid deggan oo jilicsan, si loo maqlo codadka carruurta.
- Hababka ciqaabta ee keeni kara ceebayn, cabsi gelin, aflagaaddo, dhaawac, ama go'doomin ama adeegsadaan xeelado carruurta lagu go'doomiyo waa mamnuuc.
- Ciqaab laguma xiriirin karo cunto, nasasho, ama isticmaalka musqusha.
- Cuntada looma isticmaali karo mana laga joojin karo ilmaha si ciqaab ahaan. Fursadaha ciyaarta firfircoon looma diidi karo carruurta khalad samaysay.
- Garaacidda iyo nooc kasta oo ciqaab jir ahaaneed ah waa mamnuuc
- Barashada musqusha waa in lagu sameeyaa iskaashi lala yeesho waalidiinta, iyadoo la ilaalinayo isgaarsiin joogto ah inta hawshu socoto.
- Hawlaha waa in si ula kac ah loogu qorsheeyaa iyadoo lagu saleynayo heerka horumarka ilmaha.
- Dhallaanka ka yar lix (6) bilood waa in maalin kasta lagu sameeyaa calool jiif si oo si dhow loo kormeero marka ay soo jeedaan.
- Inta lagu jiro waqtiga dhul jiifka/calool ku jiifka, dhulka waa inuu ahaadaa mid nadiif ah oo ammaan ah.
- Dhallaanka waa in la dhigaa meel adag oo ammaan ah inta lagu jiro calool jiifka, iyadoo aan la dhigeyn wax jilicsan oo hoosta ama hareeraha ilmaha inta lagu jiro calool jiifka ilmaha.
- Haddii ilmaha uu ku seexdo waqtiga calool ku jiifka, macallinku waa inuu isla markiiba ilmaha ku jiifiyaa sariir, isagoo dhabarka ku seexinaya, wuxuuna raacayaa dhammaan habraacyada hurdada badqab ah.
- Carruurta da'doodu u dhaxayso saddex (3) sano ilaa da'da dugsiga waa in la siiyaa manhaj badbaado shakhsiyeed sanad kasta.
- Carruurta da'da dugsiga ah, manhajkaas waa inuu ka koobnaadaa casharro ku saabsan sida loo soo sheego tacaddiyada jireed, galmo, ama afeed.
- Waalidiinta waa in lala tashadaa marka la diyaarinayo qorshe lagu daboolayo baahiyaha gaarka ah ee ilmo qaba baahi gaar ah.

**Goobaha Xarumaha ku Yaaliin**

- Dhammaan goobaha waa in sanad kasta ay maraan kormeer lagu xaqiijinayo in ay waafaqsan yihiin dhammaan shuruudaha dabka iyo deegaanka ee dawladda hoose iyo kuwa gobolka.
- Ugu yaraan hal (1) taleefan oo shaqeynaya waa in laga heli karaa hay'ada, lambarka teleefankana waa in waalidiinta la siiyo.
- Goobaha banaanka lagu ciyaaro waa in ay bixiyaan ugu yaraan konton (50) fuudh laba jibbaaran oo meel ciyaar ah ilma kasta oo hal mar isticmaalaya goobta.
- Goobta banaanka lagu ciyaaro waa in lagu wareejiyaa derbi ama xayndaab ugu yaraan afar (4) fuudh dhererkiisu yahay.
- Kormeerka goobta ciyaarta banaanka waa in la sameeyaa ka hor isticmaal kasta.
- Sanduuqyada ciidda waa in la daboolaa marka aan la isticmaaleyn.
- Carruurta waa in aysan joogin haddii aysan jirin biyo ku filan oo la heli karo.
- Carruurta waa in aysan joogin haddii nidaamka bulaacadda uusan shaqeynayn.
- Dhammaan qolalka ay carruurtu isticmaalaan waa in heerkulka lagu ilaaliyaa inta u dhaxaysa 68 ilaa 78 darajo Fahrenheit.
- Carruurta waa in aysan joogin haddii aan lagu ilaalin karin heerkul u dhaxeeya 68 ilaa 78 darajo Fahrenheit gudaha.
- Kuleylisooyinka shidaalka aan hawo bixin iyo kuwa la qaadi karo waa mamnuuc.
- Barkadaha dabaasha waa in laga dhigo meel carruurtu aanay geli karin iyadoo la adeegsanayo derbi iyo albaab la xiro.
- Dabaasha waa ka mamnuuc goobaha daryeelka carruurta ee ku-meelgaarka ah.
- Barkadaha dabaasha iyo kuwa ilmaha lagu dabaaliyo lama isticmaali karo oggolaanshaha Waaxda Caafimaadka la'aanteed.
- Xayawaanka waa inay caafimaad wanaagsan qabaan oo la tallaalay, kana xor yihiin cayayaanka sida kaneecada iyo shilinta, waa in laga fogeeyaa meelaha cuntada lagu kaydiyo ama lagu diyaariyo, waxaana lagu hayaa meel aan carruurtu si toos ah ugu tegi karin.
- Xamaaratada iyo raxa biyaha ku nool looma oggola in lagu hayo xayawaan rabaayad ahaan.

**Gaadiid**

- Hay'adaha daryeelka carruurta ma qaadi karaan

carruur iyada oo aan horey loo helin oggolaansho qoraal ah oo ka yimid Waaxda.

- Hay'adaha waa inay saddexdii biloodba mar qabtaan layliyo degdeg ah oo ku saabsan ka bixitaanka gaariga ee xaaladaha degdegga ah.
- Isticmaalka telefoonka gacanta iyo dirista fariimaha qoraalka ah waa mamnuuc inta la kexeenayo gaari.
- Gaadiidka maalinlaha ah waa in aanu ka badnaan 45 daqiiqo dhinac kasta (ma khuseyso safarrada iskuulka).
- Hay'adaha waa inay sameeyaan diiwaangelin maalinle ah oo muujinaya kormeerka baabuurta iyo dayactirka loo baahan yahay.
- Heerkulka gudaha gaariga waa in si dhow loo kormeeraa marka cimiladu aad u kulushahay ama u qabowdahay si loo hubiyo badqabka carruurta.
- Qof qaangaar ah waa inuu gaariga la joogaa mar kasta oo ilmo gaariga ku jiro.
- Diiwaanka rakaabka waa inuu ka kooban yahay magaca hore iyo kan dambe ee ilmo kasta, waxaana loo isticmaalaa raadraaca marka carruurta la saaro ama laga dejinayo gaariga.
- Haddii ilmaha laga qaaday guriga, waalidka ama qofka kale ee loo oggol yahay waa inuu saxiixaa diiwaanka si uu u xaqiijiyo in ilmaha la saaray gaariga.
- Diiwaanka waa in la cusboonaysiiyaa marka carruurta laga dejinayo gaariga.
- Marka ilmaha lagu wareejinayo waalidka ama qofka kale ee loo oggol yahay, qofkaas waa inuu saxiixaa diiwaanka si loo caddeeyo in ilmaha loo dhiibay.
- Marka ilmaha ugu dambeeya la dejiyo, darawalku waa inuu isla markiiba dhex maraa gaariga si uu u xaqiijiyo in aysan jirin ilmo gaariga ku haray.
- Qof shaqaale ah oo loo xilsaaray dib-u-eege ahaan waa inuu dhex maraa gaariga si uu u xaqiijiyo in dhammaan carruurta laga dejiyay gaariga. Qofka dib u eegaha ah looma oggola inuu qabto shaqo kale inta uu dhex maraayo gaariga.
- Guryaha qoyska iyo kuwa kooxda ee leh halka macallin keliya waa inay yeeshaan nidaam kale oo oggol yahay Waaxda oo lagu xaqiijinayo in dhammaan carruurta laga dejiyay gaariga.
- Marka carruurta la geynayo iskuulka, waa in lagu dejiyo kaliya goobta ay iskuulku u qoondeeyeen iyo wakhtiga uu iskuulku si rasmi ah u furan yahay iyadoo shaqaaluhu joogaan si ay u qaabilaan.
- Darawallada waa inay maraan baaritaan caafimaad sanadle ah oo ay ka gudbaan tijaabada baaritaanka daroogada.
- Darawallada iyo kormeerayaasha waa inay haystaan shahaado sax ah oo ku saabsan CPR iyo Gargaarka Xaalada Degdegga ah.
- Qalabkan soo socda waa in lagu hayaa gaariga, laguna kaydiyaa meel aan carruurtu si fudud u gaadhi karin: dab-demis, saddex-xagal milicsi degdeg ah, sanduuqa gargaarka degdegga ah, qalab gooya suunka kuraasta ama qalab kale oo loogu talagalay in si degdeg ah loogu sii daayo nidaamka xajinta carruurta ee gaadhiga xiliga xaalada degdegga ah, qalabka nadiifinta dhiigga iyo walxaha cudurada gudbiya, iyo toosh si fiican u shaqaynaya.
- Dhammaan gaadiidka ay adeegsadaan hay'adaha daryeelka carruurta ee loogu talagalay inay qaadaan toban (10) qof ama wax ka badan waa inay u hoggaansamaan Heerarka Badbaadada ee Federaalka ee loogu talagalay basaska iskuulka.
- Dhammaan gaadiidka daryeelka carruurta ee uu soo saartay shirkadda sameysa gaadiidka oo loogu talagalay inay qaadaan toban (10) ama in ka badan rakaab waa in la baaro sida ay u waajibisay Waaxdu.
- Kuraasaha rikaabka caruurta waa in loo adeegsadaa sida uu dhigayo sharciga gobolka iyo kan federaalka.
- Calaamado ay ku qoran yihiin magaca hay'adda, lambarka taleefanka, iyo lambarka taleefanka cabashada daryeelka carruurta ee bilaashka ah ee Waaxda waa in lagu dhejiyaa gaadiidka daryeelka carruurta.

**<u>U Diyaargarowga Xaaladaha Degdegga ah</u>**

- Hay'ada, iyadoo la tashanayso mas'uuliyiinta deegaanka iyo maamulka xaaladaha degdegga ah, waa inay diyaariyaan qorshe qoran oo daboolaya khataro kala duwan si loo ilaaliyo carruurta marka ay timaado xaaladaha degdegga ah oo ay ku tababaraan shaqaalaha sannad walba qorshaha.
- Dhammaan hay'adaha daryeelka carruurta waa inay waalidiinta iyo masuuliyiinta carruurta xaadireysa hay'ada daryeelka carruurta ogeysiiyaan qorshaha.

**<u>Shuruudo Gaar ah oo loogu talagalay Guryaha Daryeelka Carruurta ee Qoysaska</u>**

- Saamiga Dadka Waaweyn:Carruurta waa in la ilaaliyaa mar kasta.
- Awoodda ugu badan ee la ruqsadeeyay waa inaan laga badin.
- Saamiga Guriga Daryeelka Carrurta Qoyska iyo Jadwalka Cabirka Kooxda

| Tirada Ugu Badan ee Carruurta iyo Da'dooda (oo ay ku jiraan carruurta "qaraabo ahaan isleh" baraha waaweyn ee ka yar sagaal (9) sano jir) | Macallimiinta loo Baahan Yahay |
|---|---|
| Toddoba (7) ama wax ka yar carruur; waana in aanay ka badnayn afar (4) oo ka yar laba (2) sano jir. | 1 |
| Toddoba (7) ama wax ka yar carruur; shan (5) ama wax ka badan oo ka yar laba (2) sano jir. | 2 |
| In ka badan toddoba (7) carruur; waana in aanay ka badnayn afar (4) oo ka yar laba (2) sano jir | 2 |
| In ka badan toddobo (7) carruur ah; iyo shan (5) ama wax ka badan oo ka yar laba (2) sano jir. | 3 |

- Macallin aqoon u leh waa inuu goobta jooga mar kasta oo macallinka ugu weyn uusan joogin saacadaha shaqada.
- Tirada ugu badan ee carruurta gudaha joogta waxaa lagu go'aaminayaa iyadoo lagu saleynayo shuruudaha ugu yar ee cidhifta booska.
- Haddii tirada carruurta ay ka badan tahay 7 hal mar ama daryeelka waxaa lagu siinaa hal qol oo guriga ah, waa in goobtaas lagu heli karaa ugu yaraan 30 fuudh laba jibbaaran oo meel cang walba uu ku ciyaari karo.

**<u>Shuruudo Gaar ah oo loogu talagalay Guryaha Daryeelka Carruurta ee Kooxaha</u>**

- Saamiga Dadka Waaweyn:Carruurta waa in la ilaaliyaa mar kasta.
- Tirada ugu badan ee carruurta joogta lagama badin karo (12). Waxa ka reeban: Saddex (3) carruurta da'da dugsiga ku jirta ayaa lagu daryeeli karaa ka hor/ka dib dugsiga, fasaxyada, maalmaha barafka iyo xilliga fasaxa xagaaga.
- Saamiga Guriga Kooxda iyo Jadwalka Cabirka Kooxda

| Tirada Carruurta | Da'aha Carruurta | Macalimiinta Loo Baahan Yahay |
|---|---|---|
| Laba iyo toban (12) -- Shan iyo toban (15) (midkoodna in ka badan 12 waa da'da dugsiga) | Aan ka badnayn laba iyo toban (12) carruur ah oo saddex (3) sano jir ah ama wixii ka weyn. | 1 |
| Laba iyo toban (12) -- Shan iyo toban (15) (midkoodna in ka badan 12 waa da'da dugsiga) | Ilaa sagaal (9) carruur ah oo ka yar saddex (3) sano jir; waana in aanay ka badnayn afar (4) oo ka yar laba (2) sano jir. | 2 |
| Laba iyo toban (12) -- Shan iyo toban (15) (midkoodna in ka badan 12 waa da'da dugsiga) | Toban (10) ama wixii ka badan oo ka yar saddex (3) sano jir | 3 |

- Haddii carruur da'da iskuulka ku jirta la diiwaangeliyo, waa in barnaamij gaar ah oo loogu talagalay carruurtaas la siiyaa.
- Haddii afar (4) ama wax ka badan dhallaanka/ilmaha gurgurta ay joogaan, waa in ay lahaadaan meel gaar ah iyo macallin u gooni ah.
- Marka carruurtu hurdaan ama nasanayaan, waa in ay ug yaraan.
  hal (1) qof weyn uu soo jeedaa oo kormeeraa, ayna la joogaan tirada macallimiinta ee loo baahan yahay.
- Macallimiinta waaweyn waa in ay haystaan shahaado dugsiga sare ama mid u dhiganta.
- Mulkiilayaasha meel kale ka shaqeeya waa in ay hubiyaan in macallinka ugu weyn uu had iyo jeer goobta joogo.
- Macallinka ugu weyn looma oggola inuu ka shaqeeyo shaqo kale
  inta lagu jiro saacadaha shaqada, ilaa iyo inta Waaxdu aysan oggolaanin shaqadaas oo ka tirsan ama ay aqoonsan tahay barnaamij ay Waaxdu kafaalo qaaday ama aqoonstday.
- Macallin u qalma waa inuu joogaa goobta markasta oo macallinka ugu weyn uusan joogin saacadaha daryeelka carruurta.
- Ugu yaraan soddon (30) fiit laba jibbaaran oo meel ciyaar gudaha ah
  oo la isticmaali karo waa in la siiyaa carruur kasta.
- Tirada ugu badan ee carruurta lagu hayn karo meel gudaha ah waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo la raacayo shuruudaha ugu yar ee cabbirka dhulka.

**<u>Shuruudaha Gaarka ah eeoo loogu talagalay Xarumaha Daryeelka Carruurta</u>**

- Saamiyada Dadka Waaweyn:Carruurta waa in la ilaaliyaa mar kasta.
- Marka in ka badan laba iyo toban (12) carruur ah joogaan qof weyn waa in uu joogaa oo uu ku sugan yahay goobta.
- Saamiga Daryeelka Carrurta iyo Jaantuska Cabirka Kooxda

| Da'da Carruurta | Saamiga Dadka Waaweyn: Carruurta | Tirada Ugu Badan ee Kooxda |
|---|---|---|
| 6 toddobaad – 15 bilood | 1:4 | 8 |
| 12 toddobaad – 30 bilood | 1:6 | 12 |
| Labo (2) sano jir | 1:7 | 14 |
| 3 sano jir | 1:9 | 18 |
| 4 sano jir | 1:13 | 24 |
| 5 sano jir | 1:16 | 24 |
| Da'da Dugsiga (Fasalka Barbaarinta iyo wixii ka sareeya) | 1:20 | Ma jiro xad ugu badan |

| Da'da Carruurta | Saamiga Dadka Waaweyn:Carruurta | Tirada Ugu Badan ee Kooxda |
|---|---|---|
| Lix (6) toddobaad – Soddon (30) bilood | 1:5 | 10 |
| Laba iyo toban (12) bilood – Soddon iyo lix (36) bilood | 1:6 | 12 |
| Labo (2) – Afar (4) sano jir | 1:8 | 16 |
| Laba iyo bar (2½) – Saddex (3) sano jir (Soddon (30) – Toddoba iyo afartan (47) bilood) | 1:9 | 18 |
| Labo (2) – Seddex (3) sano jir | 1:8 | 16 |
| Laba iyo bar (2½) – Shan (5) sano jir | 1:11 | 20 |
| Laba iyo bar (2½) – Laba iyo toban (12) sano jir | 1:11 | 20 |
| Seddex (3) – Afar (4) sano jir | 1:12 | 24 |
| Seddex (3) – Shan (5) sano jir | 1:13 | 24 |
| Afar (4) – Lix (6) sano jir | 1:16 | 24 |
| Shan (5) – (12) sano jir | 1:20 | Ma jiro xad ugu badan |
| Dgsiga Barbaarinta ilaa Fasalka Shanaad (da'da shan (5) – kow iyo toban (11) sano jir) | 1:20 | Ma jiro xad ugu badan |
| Fasalka Lixaad ilaa Fasalka Laba iyo Tobnaad (da'da kow iyo toban (11) – toddoba iyo toban (17) sano jir) | 1:20 | Ma jiro xad ugu badan |

- Jaantuska Saamiga: saacadda hore/dhamaadka iyo kala badh (½) maalintii kaliya:

| Da'da Carruurta | Qaan-gaarka: Ilmo Carruurta | Ugu badnaan Cabbirka Kooxda |
|---|---|---|
| 2 ½ sano jir – 5 sano jir | 1:11 | 20 |
| 3 sano jir– 12 sano jir | 1:15 | 20 |
| 4 sano jir– 12 sano jir | 1:20 | 20 |
| Saddex iyo tobnaad (13) – Todoba iyo tobnaad (17) | 1:20 | 20 |

| | | |
|---|---|---|
| sano jir | | |

- Ilmo kasta waa inuu ku jiraa diiwaanka koox cayiman oo loo qoondeeyay kooxdaas iyagoo loo xilsaarey macallin(miin) gaar ah.
- Dhallaanka waa in ay lahaadaan meel gaar ah, mana lagu dari karo koox carruur ka weyn soddon (30) bilood.
- Carruurta looma wareejin karo koox cusub ilaa ay lagama maarmaan tahay iyadoo lagu saleynayo da'da iyo baahiyaha kobaca ee ilmaha.
- Kooxaha, marka laga reebo dhallaanka iyo tilmaha guurguurta, waa la isku dari karaa muddo gaaban oo hawl gaar ah, laakiin lagama badin karo lixdan (60) daqiiqo maalintii, iyadoo la hubinayo in saamiga dadka waaweyn:carruurta la ilaaliyo.
- Koox kasta waa inay lahaataa fasal u go'an oo ku filan dhammaan xubnaha kooxda.
- Xarumaha daryeelka carruurta waa inay bixiyaan qorshayaal cashar oo qoraal ah koox kasta oo carruur ah.
- Marka in ka badan laba iyo toban (12) carruur ah oo fasalka koowaad iyo wixii ka sareeya ay joogaan, macalin gooni ah waa in loo diyaariyaa koox gaar ah iyo meel gaar ah, iyo barnaamij gaar ah.
- Tirada ugu badan ee carruurta lagu hayn karo meel gudaha ah waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo la raacayo shuruudaha ugu yar ee cabbirka dhulka.
- Ugu yaraan soddon (30) fiit laba jibbaaran oo meel ciyaar gudaha ah
  oo la isticmaali karo waa in la siiyaa carruur kasta.
- Qolka kasta oo hurdada ah waa inuu ku lahaadaa ugu yaraan soddon (30) fiit oo boos dhul ah ilma kasta.
- Qolka dhallaanka ama ilmaha guurguurta oo leh wax ka badan hal macallin waa in macallin kasta uu mas'uul ka noqdaa bixinta daryeel joogto ah oo loogu talagalay ilmaha/ dhalaanka gaarka ah, taas oo ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn: qorsheynta iyo diiwaangelinta, isgaarsiinta, iwm.
- Ka dib markii ruqsad la bixiyo, hay'ad daryeel carruur waxay ku shaqeyn kartaa muddo aan ka badnayn lixdan (60) maalmood guud ahaan sannadka ruqsadda iyada oo aan lahayn agaasime goobta jooga.

**Shuruudo Gaar ah oo loogu talagalay Xarunta Daryeelka Carruurta ee Ku-meelgaarka ah**

- Ka hor inta aan ilmaha loo aqbalin daryeel, waalidku waa inuu bixiyo qoraal ku saabsan qiyaasta waqtiga uu filayo in ilmaha joogi doonaan xarunta.
- Hay'ada daryeelka carruurta waa inay shaqaalaha la baro agabka badbaadada shakhsiyeed oo diyaar u ahaadaan inay kala hadlaan waalidiinta.
- Xarunta ku-meelgaarka waa inay lahaataa agaasime goobta jooga oo ugu yaraan da'da 21 sano jir ah.
- Agaasimuhu waa inuu haystaa shahaadada dugsiga sare ama wax u dhigma iyo hal (1) sano oo khibrad shaqo oo buuxda oo lala yeeshay carruurta koox ahaan.
- Macallin kasta oo loo adeegsado buuxinta saamiga ugu yar ee loogu baahan yahay
  dadka waaweyn:carruurta waa inuu haystaa shahaado dugsi sare.
- Carruurta waa in lagu meel geeyaa kooxo da' ahaan ku habboon iyadoo loo helayo kormeer ku filan oo macallin qaan-gaarka ah leh.

| Ku Kooxeynta Da'da: | |
|---|---|
| **Da'da Carruurta** | **Saamiga Dadka Waaweyn: Carruurta** |
| Lix (6) toddobaad – Shan iyo tobban (15) bilood | 1:4 |
| Laba iyo toban (12) bilood – Soddon (30) bilood | 1:7 |
| Labo (2) sano jir | 1:9 |
| Seddex (3) sano jir | 1:12 |
| Afar (4) sano jir | 1:15 |
| Shan (5) sano jir (aan ku jirin Dugsiga Barbaarinta) | 1:18 |
| Da'da Dugsiga (Fasalka Barbaarinta iyo wixii ka sareeya) | 1:22 |

- Saamiga dadka waaweyn:carruurta ee koox da' kala duwan leh oo ka kooban dhallaanka:

| **Da'da Ugu Badan ee Barruurta Joogta** | **Hal dhallaan** | **Laba Dhallaanka** |
|---|---|---|
| 12 toddobaad – 30 bilood | 1:7 | 1:6 |
| 2 sano jir | 1:9 | 1:6 |
| 3 sano jir | 1:8 | 1:7 |
| 4 sano jir | 1:10 | 1:9 |
| 5 sano jir (aan ku jirin Dugsiga Barbaarinta) | 1:18 | 1:13 |
| Da'da Dugsiga (Dugsiga Barbaarinta iyo wixii ka sareeya | 1:22 | 1:15 |

- Haddii cuntada ay bixiso hay'adda, waa in ay la jaanqaadaa tilmaamaha nafaqada ee Barnaamijka Cuntada ee Carruurta iyo Qaan-gaarka ee USDA.
- Tirada ugu badan ee carruurta lagu hayn karo gudaha
  meel muqata waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo la raacayo shuruudaha ugu yar ee cabbirka laba jibaarka dhulka.
- Ugu yaraan soddon (30) fuudh laba jibbaaran oo meel ciyaar gudaha ah oo la isticmaali karo waa in la siiyaa ilmo kasta.
- Qolka kasta oo hurdada ah waa inuu ku lahaadaa ugu yaraan soddon (30) fiit oo boos dhul ah ilma kasta.
- Shaqaaluhu waa inay haystaan dukuiientiyo ku saabsan xasaasiyadda carruurta oo dhan iyo sida loola tacaalo

falcelin kasta oo xasaasiyadeed.

- Shaqaaluhu waa inay dib u eegaan u diyaar-garowga degdegga ah iyo habraacyada dabka oo waa in ay si muuqata u dhex maraan hanaanka baxsiga rubuc kasta.
- Hawlaha la mamnuucay waxaa ka mid ah dabaasha, gaadiidka, iyo bixinta adeegyo gaar ah.

Website-ka Tennessee Department of Human Services ChildCare Services (Adeegyada Daryeelka Carruurta ee Waaxda Adeegyada Aadanaha Tennessee) wuxuu ku yaalaa halkan: **[Child Care Services (tn.gov)]**

Xog badan oo ku saabsan daryeelka carruurta waxaa laga heli karaa website-ka Waaxda.

Waxaad ka:

- ✓ Baran kartaa noocyada daryeelka la xakameeyo
- ✓ Baran kartaa wax dheeraad ah oo ku saabsan noocyada daryeelka la xakameeyo
- ✓ Heli kartaa bixiye daryeel carruur
- ✓ Baran kartaa Nidaamka Qiimeynta Tayada iyo Hagaajinta (hore loo oran jiray Warbixinta Dhibcaha iyo Barnaamijka Tayada Xiddigaha)
- ✓ Heli kartaa xafiiska ruqsad bixinta daryeelka carruurta ee deegaanka
- ✓ Dib u eegi kartaa manhajka badbaadada shakhsiyeed ee hadda socda
- ✓ Akhrin kartaa wax ku saabsan hindisooyinka cusub ee daryeelka carruurta
- ✓ Heli kartaa xafiiska shahaadada daryeelka carruurta ee kuugu dhow
- ✓ Heli kartaa macluumaad ku saabsan xlashada daryeelka carruurta
- ✓ Heli kartaa xarun kheyraad iyo tixraac daryeel carruur

Iyo waxyaabo kale oo badan

**Xarumaha Kheyraadka iyo Talo-bixinta Daryeelka Carruurta**

ennessee Child Care Resource and Referral (CCR&R) Network waxay leedahay 9 goobood oo CCR&R ah oo ku kala yaala guud ahaan gobolka. Goob kasta oo CCR&R ah waxay shaqaaleysiisaa koox macallimiin aad u tayo sareeya oo bixiya tababar iyo hagid macallimiinta daryeelka carruurta ee shatiga DHS haysta ee deegaankooda jooga. CCR&R-yada sidoo kale waxay kheyraad qiimo leh siiyaan waalidiinta raadinaya daryeel carruur oo tayo sare leh. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah booqo website-ka Adeegyada Daryeelka Carruurta ama tnccrr.org

**kidcentral TN**

Macluumaad ku saabsan caafimaadka carruurta, waxbarashada, iyo horumarka, iyo sidoo kale adeegyada gobolka ee la heli karo waxaa laga heli karaa: https://www.kidcentraltn.com/

**Lambarka Degdegga ee Waaxda Adeegyada Carruurta**

Ku Soo Sheeg Xadgudubka ama Dayacaadda Carruurta 1-877-237-0004

**Lambarka Degdegga Cabashada Daryeelka Carruurta**

Aagga Nashville: (615) 313-4820
Lambarka Bilaashka ah: 1-800-462-8261

Haddii aad ka welwelsan tahay hay'ad daryeel carruur oo jirta ama aad rabto inaad soo sheegto hawlgal sharci-darro ah, wac lambarka degdegga cabashada ee Waaxda.